San Diego City Schools

Fact Sheet

Xilliga gu'ga 2005

Xaqiiqooyinka ku Saabsan...Sharciga dhigeya inaan Ilmo Qudheeta la Dayacin

Sharciga dawlada dhexe wuxuu dhigeyaa *inaan Ilmo Qudheeta la Dayacin (NCLB)* wuxuuna afar siyaabood isbeddelo saameyn leh ugu sameynayaa waxbarashadda dawlad-goboleedka iyo dugsiyada degmada: qaadista masuuliyada weyn ee natiijooyinka, kordhinta awooda waxbarashadda degmada ee isticmaalka lacagta dawladda dhexe, ikhtiyaarka waalidiinta oo la badiyo, iyo awood saaritaanka habka wax loo dhigeyo taas oo la caddeeyey inay mid wax ku-ool ah oo shaqeyneysa ay tahay. Isbeddeladaasu waxay taageeyaan ahmiyada waxbarashadda degmadu ay beyahan dambe siisey si aan ardeydeena heerka waxbarasho ee ay u baahan yihiin u gaadhsiino , xaga xirfadaha qoraalka, akhriska, iyo xisaabta.

Waa maxay saameynta ay ku yeelatay Dugsiyada Degmada?

- Waxaa sannadka 2004-05 deeqda lacageed ee dawladda-dhexe ee Title I loo yeqaano helay 126 dugsi oo degmada ka mid ah iyo 19 dugsi oo gaar ah. Dugsiyada deeqdaas lacageed la siiyo waa inay ardeyda dhigata dugsiyada saboolka ah ee buundooyinkoodu ay hooseeyaan kor u soo qaadaan, isla mar ahaantaasna, waa inay ka shaqeeyaan sidii ay u dabooli lahaayeen farqiga u dhexeeya ardeyda buundooyinkodu ay sareeyaan iyo kuwa ay hooseeyaanba.

- Waalidiintu waxay hada xaq u leeyihiin oo dugsiyada ilmahoodu dhigto ka codsan karaan warbixinada ku saabsan shahaadooyinka macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee ka shaqeeya fasalada ay ilmahoodu dhigtaan.

- Dawlad-goboleedku waxay qaar ka mid ah dugsiyada Title 1 u magacawdey inay yihiin Dugsiyada Barnaamijyada Dib-u-hagaajinta u baahan. Taas oo ku salleysan natiijooyinka ardeyda dawlad-goboleedka, dugsiyadani waa kuwa ku guuldareysta inay sameeyaan horumar waxbarasho oo wacan muddo laba sanno ah oo isku xigta ah. Jadwalkan hoos ku taxan wuxuu muujineyaa dugsiyada iyo muddada loo magacaabey inay yihiin Dugsiyada Barnaamijyada Dib-u-hagaajinta u baahan sida ku qeexan NCLB iyo kaalmooyinka dheeraadka ah iyo ikhtiyaariyada ay ardeydu ka heli karaan sharciga NCLB. Dugsiyada degmada ee aan liiskan ku jirin waxaa laga yaabaa inuu saameeyo sharciga NCLB, sababtoo ah waxaa laga yaabaa inay dugsiyadaas ku soo biiraan ardeyda ka tegeysa Dugsiyada Barnaamijyada Dib-u-hagaajinta u baahan.

Dugsiyada loo aqoonsadey inay Barnaamijka Dib-u-hagaajinta u baahan yihiin	**Ikhtiyaariyada iyoAdeegyada la siineyo ardeyda iyo waalidiinta**
Barnaamijka Dib-u-hagaajinta ee Sannadka 1aad – 18 dugsi ▪ Bayview Terrace* ▪ Dana (5-6) ▪ Emerson/Bandini ▪ Encanto ▪ Knox ▪ Logan ▪ Muir (K-12) ▪ Rosa Parks ▪ Webster ▪ Dhexe Correia ▪ Dhexe Montgomery ▪ Dhexe Wangenheim ▪ ALBA ▪ Clairemont Sare ▪ Sare Garfield ▪ Twain ▪ Darnall Charter* ▪ Holly Drive Charter*	▪ Waalidiintu waxay ikhtiyaar u leeyihiin inaysan ilmahooda ku qorin dugsiyada barnaamijyada dib-u-hagaajinta u baahan . Degmada ayaa gaadiid siin doonta.
Barnaamijka Dib-u-hagaajinta ee Sannadka 2aad – 5 dugsi ▪ Crown Point* ▪ Garfield ▪ Dhexe Marston ▪ Dhexe Pacific Beach ▪ Sare Madison	▪ Waalidiintu waxay ikhtiyaar u leeyihiin inaysan ilmahooda ku qorin dugsiyada barnaamijyada dib-u-hagaajinta u baahan . Degmada ayaa gaadiid siin doonta. ▪ Adeegyada siyaadada ah (sida wax barida) ayaa la siin doonaa ardeyda u baahan marka dugsiga laga baxo kedib. Waalidiintu waxay kala dooraneyaan liiska ha'ayadaha adeegyada bixiya ee ay dawlad-goboleedku ansixisey.
Barnaamijka Dib-u-hagaajinta ee Sannadka 3aad – 12 dugsi ▪ Baker* ▪ Johnson* ▪ Dhexe Bell ▪ Dhexe Farb ▪ Dhexe Kroc ▪ Dhexe Roosevelt ▪ Dhexe Taft ▪ Sare Morse ▪ Dhexe Clark ▪ O'Farrell Charter ▪ Tubman Village Charter* ▪ Sare Hoover *	▪ Waalidiintu waxay ikhtiyaar u leeyihiin inaysan ilmahooda ku qorin dugsiyada barnaamijyada dib-u-hagaajinta u baahan. Degmada ayaa gaadiid siin doonta. ▪ Adeegyada siyaadada ah (sida wax barida) ayaa la siin doonaa ardeyda u baahan , marka dugsiga laga baxo kedib. Waalidiintu waxay kala dooraneyaan liiska ha'ayadaha adeegyada bixiya ee ay dawlad-goboleedku ansixisey. ▪ Waxaa macquul ah inay dawlad-goboleedku dhexgelis ku sameyso si adeegyo iyo ikhtiyaariyo dheeraad ah loo helo.
Barnaamijka Dib-u-hagaajinta ee Sannadka 4aad – 8 dugsi ▪ Balboa ▪ Kennedy ▪ King ▪ Dhexe Keiller ▪ Dhexe Mann ▪ Dhexe Wilson ▪ Sare Gompers ▪ Memorial Charter	▪ Waalidiintu waxay ikhtiyaar u leeyihiin inaysan ilmahooda ku qorin dugsiyada barnaamijyada dib-u-hagaajinta u baahan. Degmada ayaa gaadiid siin doonta. ▪ Adeegyada siyaadada ah (sida wax barida) ayaa la siin doonaa ardeyda u baahan , marka dugsiga laga baxo kedib. Waalidiintu waxay kala dooraneyaan liiska ha'ayadaha adeegyada bixiya ee ay dawlad-goboleedku ansixisey. ▪ Dib-u-habbeynta lagu sameynayo dugsiyada waxaa ka mid ah dib-u-hagaajin aad u weyn iyo isbeddel la sameeyo oo saameyn ku yeelanaya shaqaalaha iyo maamulka dugsiyada.

*Dugsiyadii sannadkii *2003-04 AYP gaadhey* www.sandi.net/NCLB La naqtiimey 4/8/05

SOMALI VERSION: NCLB SPRING 2005

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah."